Dhibbanayaasha dembiga dano u gaar ayay qabaan, xitaa marka dembiilaha la xukumo. "Arrimaha Xukunka Ka Dambeeya" oo xuquuqda dhibbanayaasha dambiga ka warramaya, sida ay dhibbanayaasha akhbaarta ku helayaan, iyo tallaabooyinka ammaanka iyo soo kabashada.

SIIDAYNTA OGAYSIISKA

Dhibbanayaasha dambiga xaq ayay u leeyihiin in ay helaan ogaysiis marka dambiile xabsiga, rugta haynta, ama Waaxda Asluubta Minnesota (DOC) maamusho laga siidayo. Dhibbanayaasha waa in ay ogaysiis ku saabsan marka dembiilaha xabsiga gaban ama midka muddada dheer laga siidaynayo.

Ogaysiiska siidaynta waxaa la bixinayaa (siidayamaha shaqada iyo muddada dheer ee dusha laga eegayo) marka xabsi yar loo gudbinayo, iyo marka uu maxbuusku cararo ama dhinto.

Xabsiga degmada

Si lagu helo ogaysiis xabsiga degmada la xariira, dhibbanayaasha waa inay si toosa codsiyadooda oo qoraala u diraan xabsiga. Qaabka ogaysiiska degmooyinku waa ay ku kala duwanyihiin, marka dhibbanayaasha waxaa lagu dhiirrigalinaya in ay xabsiga la xariiran si ay ku ogaadaan sida codsiga loo xaraynayo.

Dhibbanayaasha waa in VINE (Macluumaadka iyo Ogaysiiska Joogtada ee Dhibbanaha la Siiyo) iska diwaangaliyaan, adeegyo iswada ayaa dhibbanayaasha kula socodsiinaya xagga telefoonka/ama iimayl marka dambiilaha la siidaynayo.

Haddii waqti dambe dembiilaha dib loo xiro, dhibbanaha waa in uu codsi cusub xareeyo, uu xabisga ama dib isku diwaangaliyo adeegyada VINE. Tani waxay kaloo ku taxluuqdaa haddii eedaysanuhu oo xabsiga muddo gabaan kelya dibadda ka joogay.

Rugta Asluubta

Ogaysiiska siidaynta ee rug DOC (xabsiga) ka imaanaya, dhibbanayaashu waa in ay codsiga kala xariiraan MN CHOICE, adeeggainternetka ah. Dhibbanayaasha waxaa la ogaysiin doonaa marka dembiilaha loo wareejinayo xabsi yar, baxsado, dhinto, iyo wixii siidaymaha dambe haddii dambiilaha dib xabsiga loogu soo xiro .

Marka ay MN CHOICE la xariirayaan, dhibbanayaasha uu dembiile weeraray waxa ay codsan karaan in la siiyo macluumaad dheeraada iyo ogaysiis haddii dembiilaha uu mudnaansho u yeesho in jaalliyadda heerka halista lala socodsiiyo. Waxaa sii dheer, marka CHOICE la kaashado, dhibbanayaasha waxay la xariiri karaan shaqaalaha DOC iyo ay siiyaan waribixin la xariirta dembiilaha qorshihiisa dib ugu noqoshada.

SEETA-DHEERAYNTA XABSIGA IYO SIIDAYN KOORMEERID LEH

Ogaysiiska dhibbanaha loo siidaynayo waa in ay ku jirto shuruudaha dembiilaha laga siidaynayo iyo magaca wakiilka ama hay'adda loo xilsaaray kormeerka. Waxaa sii dheer, dembiilayaasha DOC ama siidaynta kormerka, magaca walidka kormeeraya waxaa laga heli karaa bogga "Dembiile Sheegaha" ee shabakadda internetka DOC ku yaalla.

Dhibbanayaasha waxay xaq u leeyihiin in ay ogaadaan xaaladda kormeerka ama siidaynta shuruudda leh. Macluumaad qaasa ee dheeraada, sida dembiilaha cinwaankiisa, rugta uu ka shaqeeyo, iyo natiijooyinka qiimaynta nafsiyeed dhibbanaha lalama wadaagayo.

Dhibbanayaasha waxa ay xaq u leeyihiin haddii ama haddii uu dhowray ama aanu dembiilaha dhawrin seta-dheraynta ama siidaynta shuruudda leh, laakiin, ayaga si toosa laguma wargalin karo addeecid la'aanta. Warbixinnada ku saabsan dhawritaan la'aanta waa in uu sameeyo wakiilka kormeerka ama sarkaalka seta-dheeraynta.asluubta waa in lala socodsiiyo. Ku dhaqanka falal dembiyeedka waa in hay'adaha ammaanka ee lugta ku leh loo sheego. Jabinta seta-dheeraynta ama siidaymaha shuruudda leh oo idil ma sabibi karaan in lagu celiyo xabsi gaaban ama xabsi dheer.

Dembiilayaasha qaarkood ee ku jira seta-dheeraynta waxay yihiin kuwo "aan la koormeerayn" macnahu waxuu yahay in aan sarkaal qaasa loo xilsaarin dembiilahaas, iyadoo dembiilayaasha qaarkood ay maxkamaddu dusha ka eegayso. Si aad u soo gudbiso walaaca aad dembiilaha ka qabto, hay'adda kormeerka ama jaalliyadda asluubta la soo xariir, ama xeerilaaliyaha la soo xariir si lagugu caawiyo in aad sidii ay suurtagal u noqon lahayd in jabinta shuurudaha kormerka maxkamadda lala socodsiio.

Dembiilayaasha waxay codsan karaan in kormeeriddooda gobol kale loo gudbiyo. Waxaan waxay dhacaan marka qof gobol kale deggan uu dembi Minnesota ka galo. Si lagu ogaado in dembilaha kormeerkiisa gobol kale ama Minnesota dib loogu soo gudbiyaya, gal shabakadda internetkawww. interstatecompact.org iyo ayadoo calaamadda "ICOTS" laga raadiyo.

Dembiilaha kormeerka ku jira waxa uu xaq u yeelan karaa siidaynta hore ee kormeerka haddii shuruudaha qaarkood la qanciyo. Looma baahna in ogaysiis dhibbanha loo gubdiyo, laakiin dhibbanaha waxa uu wakiilka weydiisan karaa haddii uu xaq u yeelanayo siidayta hore.

Dhibbanayaasha waxaa lagu dhiirrigalinayaa in ay wakiil la soo xariiraan marka ay su'aalo adeec la'aanta la xariira jiraan, iyo dacwado xariira, iyo xitaa walaacyo kale ee dambiilaha ku saabsan.

DACWADAHA XUKUNKA XIGA

Ka qaybgalka Dhibbanayaasha hawlaha garsoorka dembiyada kuma soo afjarmayso xukumidda. Laakiin, sida ay dacwadaha xukunka xiga u shaqeeyaan, dhibbanayaashu waa in ay tallaabooyinka ka qayb qaadashadooda qaadaan.

Racfaanka: Xeerilaaliyeyaasha xafiiskooda waxaa laga doonayaa in ay dhibbanayaasha u sheegaan haddii racfaan la qaatay. Tan waa wax si toosa la isaga doonayo; dhibbanayashana lagama rabo in codsi qaasa ay weydiistaan. Dhibbanayaasha waxaa lala socodsiin doona arrimaah laysku haysto, qaabka, dhageysiyada la qabanayo, xuquuqdooda, iyo natiijada.

Dib u celinta seet-dheeraynta: Dhibbanayaasha ma laha sharci u bannaynayo in lala socodsiiyo marka dembiilaha uu jabiyay nidaamka seta-dheeraynta. Si kastaba ha noqotee, dhibbanayaahsa waxaa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii wadaan xariirka kala dhaxeeya wakiilka asluubta una sheegaan fikraddooda la xariirta hawlsocodsiin kasta ee seeta-dheeraynta. Dhibbanayaashu, aygoo ah sida xubin qof dadweynaha ka mid ah, waxa ay ka qaybqaadan karaan dhageysiyada seta-dheeraynta.

Diiwaan ka saaridda: Dembiilayashaa waxa ay codsan karaan in xogta dacwadahooda iyo xukunka diiwaanka laga saaro. Dhibbanayaasha waxa ay xaq u leeyihiin in lala socodsiiyo dacwadaha la xariira diiwaan ka saaridda, si ay fikraddooda u dhiibtaan, in go'aanka la gaaray lala socodsiiyo. Si ogaysiiska diiwaan ka saaridda lagu helo, dhibbanahu waa in uu qooraal ku weydiisto xeerilaaliyaha xafiiskiiska.

Isbitaalka Dhimirka la dhigo: Dhibbanayaasha waxa ay xaq u leeyihiin in la ogaysiiyo haddii dambiilaha codsigiisu uu yahay in isbitaalka dhimirka lagu dhigayo, in uu dhageysi kasta ee xiga ka qaybqaato, la ogaysiiyo natiijada, iyo la ogaysiiyo marka dembiilaha isbitaalka dhimirka laga siidayay. Si lagu helo ogaysiiska, dhibbanayaashu waa in ay codsi qoraal ah xafiiska qareenka degmada u diraan kaaso u sii gudbin doonaa Waaxda Adeegyada Aadanaha.

Xabsi Daa'in: DOC waxa ay dhibbanaha la dilay xaaskiisa ama qofka xiga waxa ku saabsan dhageysiyada siidaynta ee dembiilayaasha xabsi daa'inka ku jira. Dhibbanayaashaan waxa ay xaq u leeyihiin in ay goobjoog ka noqdaan dhageysiga iyo fikraddooda ay dhiibtaan, hadal ama qoraal. Maamulaha waa in uu tixgaliyo dhibbanaha rabitaankiisa marka go'aanka siidaynta uu dhacayo.

Ogaysiiska qaarkood ee dhibbanayaasha loo dirayo lama helayo sanado kaddib marka xukunka uu dhaco, marka casriyaynta macluumadka hay'adda muuhimka e qofka la xariirayo waa kuwo muhiiima.

AMMAANKA DHIBBANAYAASHA

Helitaanka caawimaadda: Dhibbanayaasha dambiyada weerarka ee aan weli helin caawimaadda adeegyada dhibbanayaasha la siiyo waxaa lagu dhirriigalinayaa in ay sidaa yeelaan si loogu toosiyo qorshaha ammaanka iyo soo kabashada. Diiwaanka bixiyaha adeegyada dhibbanaha waxaa laga helayaa shabakadda OJP Website.

Barnaamijka Asturidda Cinwaanka: Barnaamijka Safe at Home waa barnaamij asturaya cinwaanka dadka ka badbaaday dembiga bahdilka, kufsashada, iyo dabagalka, aama qaar kale oo ammaankooda u baqaya. Shabakadda Internetka Wasiiru Dawlaha Minnesota (Minnesota Secretary of State Website) waxaa ku jira macluumaadka barnaamijyo iyo ururrada deegaanka si nidaamka arjiga loogala xariiro.

Baaritaanka Asturan: Dhibbanayaasha kufsiga iyo dhibbanyaasha kale ee dembiyada weerarka oo ay dhici karto in ay soo gaartay dembiilaha shahwadiisa ama dhiiggiisa, waxa ay samayn karaan codsi asturan, kaddib marka xukunka uu dhaco, ayagoo u soo maraya xeerilaaliyaha xafiiskiisa si baaritaan la xariira HIV dembiilaha looga qaado iyo naatijooyinka loogu soo gudbiyo.

Jabinta amarrada badbaadada: Dembiilayaasha xabsiga ku jira, jabinta amarrada madaniga ee badbaadada iyo amarrada dembiga la xariirka waa in lagu ogaysiiyo hay'adaha ammaanka ee degaanka iyo xabsiga ama rugta asluubta.

Fidinta amarrada badbaadada: Dhibbanayasha amarrada badbaadada waqtigoodi dhacay ama dhici doona inta uu dembiilaha xabsiga ku jiro waxa ay maxkamadda ka codsan karaan amar cusub xitaa haddii dembiilaha uu handadaadyo cusub ama qabanqaabin falaldembiyeed aanu samayn inta uu xabsiga ku jiray.

Isu diyaarinta siidaynta: Kahor inta aan dembiilaha la siidayn, dhibbanayaasha dembiile ku jira rugta DOC waxa ay la xariiri karan maamulaha kiiska DOC si ay uga xaajoodaan wax kasta ee ammaanka quseeya iyo loo sheego ra'yiga qorshaha siidaynta ama shuruudaha. Maamulaha kiiska waxa uu la socda macluumaadka dhibbane kale ee "Sheegaha Dambiilaha" ee shabakadda DOC Website ku yaalla.

SOO-CELINTA IYO EEDABAXA

Dhibbanayaasha uu dembiilaha xabsiga ku jiro, waxaa muhiim ah in la xaqiijiyo in amarrada soo-celinta loo diray rugta si soo-celinta looga soo qaado lacag kasta ee xabsiga laga sameeyay. Dembiilayaasha seeta-dheeraynta ku jira, dhibbanayaashu waxay la xariirayaan sarkaalka seeta-dheeraynta, ama, haddii aan loo xilsaarin waaxda seta-dheeraynta ama maalmulka maxkamadda wax kasta arriamha eedbaxa la xariira.

Kaddib marka xukunka laga gudbo, dhibbanayaasha dembiyada weerarka wax ay codsan karaan eedbax ka caawiya kharashka uu dembiga sababay, sida kharashka caafimaadka iyo mushaarka la waayay. La soo xariir OJP si aad macluumaad waqtiyada habka iyo xaraynta ku saabsan.

ILAHA

Macluumaadka Xaalka Maxbuuska

VINE (Victim Information and Notification Everyday)
www.vinelink.com
877-664-8463 | TTY: 866-847-1298
DOC Offender Locator: www.doc.state.mn.us

Codsashada Siidaynta Ogaysiiska

County jail:
www.vinelink.com | 877-664-8463

Department of Corrections facility (Waaxda Rugta Asluubaha):
www.minnesotachoice.com | 800-657-3830

Department of Corrections (Waaxda Asluubta)

Barnaamijka Gargaarka Dhibbanaha

victimassistance.doc@state.mn.us | 800-657-3830
Macluuumaad ku saabsan: MN CHOICE, hawlaha cadaaladda soo celinta, dambiilayasha hororka.

Magdhowga Lacagta

Minnesota Crime Victims Reparations Board (Guddiga Eedbaxa Dhibbanayaasha Dembiga)
Office of Justice Programs (Xafiiska Barnaamijyada Garsoorka): ojp.dps.mn.gov
651-201-7300 | 888-622-8799

Helitaanka Macluumaadka Kiisaska Rayalcaamka

Minnesota Judicial Branch Website
www.mncourts.gov/publicaccess

Barnaamijka Cinwaanka Asturan

Safe at Home, Minnesota Secretary of State
www.sos.state.mn.us | safe.athome@state.mn.us
651-201-1399 | 866-723-3035
MN Relay Service: 800-627-3529 or 711.

Ilaha Dhibbanayaasha

Office of Justice Programs (Xaafiiska Barnaamijyada Garsoorka)
Diiwaanka bixiyaha adeegyada dhibbanayaasha, macluumaadka dhibbanyaasha dambiga, dib u celinta, OJP Website: ojp.dps.mn.gov
651-201-7300 | 888-622-8799 | TTY: 651-205-4827

Arrimaha Xukunka Xiga

Xafiiska Barnaamijka Caddaaladda
WAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA

Office of Justice Programs
MINNESOTA DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY